THE WORLD BANK

Working for a World Free of Poverty

# WAR SAXAAFADEED

**News Release**
2013/322/AFR

# Soomaaliya: Cidhib-tirka Budhcad-badeedu Waxay U-Baahan Doontaa Kobcin Dheeraad ah ee Xeebaha iyo Gargaar Caalami ah oo Dib Loogu Dhiso Qaranka Soomaaliya

**MUQDISHO, Abril 11, 2013** – Inkasta oo dhacdooyin budhcad-badeednimo ay ka dhaceen Geeska Afrika 12 kii bilood ee ugu danbeeyey, taxliilr cusub oo Baanka Adduunku ku sameeyey kharashka dhaqaale iyo dad ahaana wuxu leeyahay “Soomaaliya iskama furdaamin karto ka bixitaanka budhcad-badeednimada; beesha caalamkuna keligood kuma tiirsanaan karaan wakaaladahooda ammaanka si ay u jabiyaan budhcad-badeeda barri ahaan iyo bad ahaanba.”

Warbixintan cusub, oo Madaxweyne Xasan Sheekh Maxamuud, oo taageeray soo-saarideeda—**Budhcad-badeedda Soomaaliya: Cidhib-tirka Khatarta, Dib-u-dhiska Qaran** — wuxu soojeedinayaa in xalka waara ee lagu cidhib-tirayo bushcad-badeednimada ay ku imaan karto oo keliya dib-u-abuurista qaran Soomaaliyeed oo shaqaynaya oo u keeni kara adeegyada daruuriga ah dhammaan dalka oo dhan si loo yareeyo faqriga oo loo abuuro fursado. Waxay u baahan doontaa in la garto culayska iyo isbeddelada siyaasadda gudaha marka la qeexayo sidii loo siin lahaa caafimaad wanaagsan, waxbarasho, nafaqayn, iyo adeegyada kale Soomaalida, gaar ahaan kuwa ku nool jiidaha ay budhcad-badeednimadu ka jirto.

*“Sida warbixintu sheegayso, xalka budhcad-badeednimada Sooaamlidu waa siyaasad hor iyo horranba”* ayey ku qoreen **Makhtar Diop, Madaxweyne-xigeenka kooxda Baanka Adduunka ee Aftrika,** iyo **Kaushik Basu, Dhaqaale-yahanka sare ee Baanka Adduunka**, Horudhaca warbixinta cusub. *“Warbixintan waxay xaqiijinaysaa in ka-shishe khayraadka awoodda ciidan iyo maaliyadeed, ay beesha caalamku ka gargaari karto ama ay tahay in ay ka gargaarto Soomaaliya noolaynta aqoonta—aqoonta sida ay nidaamyada xoogaga guduhu u habayn karaan wadaaga khayraadka, sida ay qabaa’ilka u saamayso, iyo xidhiidhada qabaa’ilka, iyo ugu danabyn sida loo qeexo deganaanshaha siyaasadda qaranka—si xal loogu helo dhibaatada budhcad-badeednimada.”*

**Kharashka budhcad-badeednimadu waa wax weyn**
Mid ka mid ah qiimaynaha faahfaahsan ee kharashka caalamka iyo gobolka ee budhcad-badeednimada Soomaaliya, wuxu Baanka Adduunku ku sheegay in, sababta xajmigeeda awgeed, juqraafi ahaan inta ay gaadhsiisan tahay, iyo dirirta oo ku abuurtay cabsi dadweyne oo gaadhsan caalamka oo dhan, khasaaraha dhaqaalaha adduunka ka soo gaadhaa in lagu qiyaasay US$18 bilyan sannadkii oo kharash ahaan ku kordha ganacsiga— waa qaddar aad uga yar inta lagu qiyaaso in isku-celcelin ahaan furasho loo bixiyo oo dhan US$53 milyan oo la bixiyey illaa 2005.

Ma aha keliya in ay cashuur qarsoon budhcad-badeednimadu saartay ganacsiga adduunka guud ahaan, waxa kale oo ay saamayn weyn u gaysatay hawlaha dhaqaalaha dalalka deriska ah. Illaa 2006 wadamada Bariga Afrika waxa ku dhacay hoos u dhac dalxiiskooda iyo wax-soosaarkooda kaluumaysiga. Qaybta dalxiiska oo wanaagsanayd, kharashka ku baxa Bariga Afrika illaa intii ay bateen dhaqdhaqaaqa budhcad-badeednimadu wuxu kordhay boqolkiiba 25 oo ka hooseeya wadamada kale ee Afrikada saxaaaha ka hooseeya. Sidoo kale, badeecadaha kalluumaysiga ee la dhoofiyo ee wadamada ay saamaysay budhcad-badeednimadu marka la barbardhigo gobolada kale hoos-u-dhac ayaa ku yimid boqolkiiba 23.8 illaa 2006, taas oo qayb ahaan ah hoos-u-dhaca wax-soosaarka. Wadarta kalluunka tuunaha ee Galbeedka Badweynta Hindiya waxay hoos-u-dhacday boqolkiiba 26.8 iyada oo ay maraakiibtu u guureen jiido kalluumaysi oo ammaan ah.

Soomaaliya laf ahaanteeda waxa iyana ku dhacay saamayn aad ah oo kaga timid budhcad-badeednimada. Korodhka kharashka ganacsiga oo lagu qiyaaso inuu dalka ku kacay US$6 milyan sannadkii; iyada oo tiradaasi aanay ku jirin in aanay Soomaaliya kobcin karin oo ballaadhin karin ganacsigeeda badda iyo kalluunka inta budhcad-badeeda loo oggol yahay inay ka hawlgalaan biyaheeda.

Xagga khasaaraha dad ahaan ee budhcad-badeednimada Soomaaliya, illaa 3,741 oo badmaax oo ka kala yimid125 dal oo kala duwan ayaa la qafaashay, oo la haystay muddooyin gaadhay illaa 1,178 maalmood. In gaadhaysa illaa 97 badmareen ayaa ku geeriyooday ama markii la hajuumay, markii loo hayey qaabka daryeelxumada leh, ama markii la isku dayayey in la soo furto.

Dhinaca Soomaaliya, khasaaruhu iyana waa sarreyaa; boqolaal budhcad-badeed ayaa la aaminsan yahay inay badda ku dhinteen.

**Ganacsiga budhcad-badeednimada Soomaaliya waa nooc gooni ah**
Maadaama budhcad-badeednimada Soomaaliya ay badiyaa tahay ganacsi afduub furasho u taagan, waxay xoog ugu tiirsan tahay taageerada barriga ee noolka leh sida cuntada, biyaha, shidaalka iyo maandooriyaha caleenta ah ee *Qaadka* ee loo keeno qawlaysatada hubaysan ee ilaaliya maraakiibta muddada ay socdaan wadahadalada furashadu.

Budhacad-badeeda Soomalidu waxay u baahan yihiin sugnaanta marinka xeebta iyo iska ilaalinta quwadaha ammaanka ee caalamka iyo qarankaba iyo denbiilayaasha kale ee la loolamaya. Xaqiiqada in budhcad-badeedu ay si xor ah ugu xidhi karaan markaaiibta ay soo afduubaan xeebaha Soomaaliya ayaa muujinaysa awoodooda ay ku heleen taageerada saraakiisha dawladda, dadka ganacsatada ah, madaxda qabaa'ilka, miliishiyaadka, iyo beelaha maxaliga ah intaba. Goobahaas maraakiibta lagu xidho, budhcad-badeedu waxay awoodeen inay isticmaalaan habab isugu jira lacag bixin, hanjabaad si ay u sugaan marinkooda oo aan caqabad lahayn ee xeebaha muddo dheer. Waxa lagu qiyaasaa in hoggamiyayaasha iyo dilaaliinta ganacsiga budhcad-badeednimada Soomaaliya ay qayb ahaan u qaataan boqolkiiba 70 illaa 86 waxa ka soo baxa budhcad-badeednimada, iyada oo la'aantood taageerada maraakiibta xeebaha lagu soo xidhayaa aanay suurtowdeen.

*"Si fiican ufahamka sida budhcad-badeednimadu u awoodeen inay ka jiraan gudaha magaalooyinka iyo beelaha xeebaha Soomaaliya ayaa siinaysa dawladda cusub ee Muqdisho iyo beesha caalamkaba fikrad fiican ee kobcinta siyaasado iyo isbahaysiyo looga baahan doono si loo cidhib-tiro budhcad-badeednimada goobaahaas shidan iyo sidii dib loogu dhisi lahaa qaran Soomaaliyeed oo cusub oo ka jira Bariga Afrika,"* ayey tidhi **Bella Bird, Agaasimaha Dalka ee Baanka Adduunka ee Soomaaliya, Suudaanta Koonfureed iyo Suudaan** oo hadda si dhaw ugala shaqaynaysa dawladda qorshayaasheeda dib u dhiska adeegyada daruuriga ah ee dadweynaha Soomaaliya iyo ku soo ridista dalka dhabada horumarka iyo barwaaqada.

**Habka la-dagaalanka budhcad-badeednimadu wuxu u baahan yahay isbeddel**

Saamiga 300:1 ee kharasha caalamka kaga budhcad-badeednimada iyo lacagta furashada ee budhcad-badeedu hesho ayaa ku siinaya sabab wanaagsan in Soomaaliya hesho taageero caalami ah. Siyaasadaha hadda ka jira barriga iyo badda ee lagu xakamaynayo budhcad-badeeda Soomaaliya waxay ama tahay wax aan naf lahayn ama suurtgal ahaan aan waarayn. Dhexgalka gudaha barriga sida kobcinta dhaqaalaha gudaha ama tallooyinka xoojinta amniga waxa loola jeedaa ka niyadjabinta dhalinyarada Soomaaliyeed inay noqdaan budhcad-badeed iyada oo la kordhinayo ku soo jiidashada shaqooyin kale ama ballanqaadka muddoyin xabsi dheer ah marka la qabto. Sida warbixinadu ka digayaan, hase ahaatee, budhcad-badeedu waxay u ballanqaadi doonaan da'yarta iyo dhalinyarada Soomaaliyeed lacag badan haddii ay qaataan khatarta qabashada iyo dhimashada badda. Iyada oo ilaalada badda ee xoog u hubaysan iyo ammaan suggidda maraakiibta ganacsiga la aaminsan yahay inay ka tarjumayso sababta budhcad-badeednimadu hoos ugu dhacday gudaha 2011 iyo 2012, hadana tallaabooyinkaasi waxay shaqayn doonaan keliya inta ay quwadahaasi badda sii joogaan.

“*Sababta oo ah sarraynta kharashka tallabooyinka la dagaalanka, muddada dheer waxa laga yaabaa in aanay sii waarin,”* ayuu sheegay qoraagu **Quy-Toan Do, dhaqaale-yahan sare ee waaxda baaritaanada ee Baanka Adduunka iyo Madaxweyne-xigeenka Baanka adduunka ee Afrika.** *“Marka la eego sida budhcad-badeednimada Geeska Afrika ay aad ugu tiirsan tahay hawlaha barriga si ay u sii jirto, xal kasta oo muddo dheer ah waxa ku jiri doona heshiis siyaasadeed oo ildheer oo lala galo awood-hayayaasha gudaha—jeedin fejignaan, laga jeedinayo denbiilayaasha oo loo jeedinayo kuwa suurtageliya budhcad-badeednimada.”*

Si aad u eegto warbixinta cusub fadlan booqo:


**Xidhiidhada:**
*Gudaha Muqdisho:* Phil Hay (w) +1 202.473.1796 (c) +1 202.409.2909, phay@worldbank.org
*Gudaha Nayroobi:* Peter Warutere (w) +254.20.322.6444 (c) +254.722.524472 pwarutere@worldbank.org
*Gudaha Washington:* Aby K. Toure, (202) 473-8302, akonate@worldbank.org


Wixii macluumaad dheeraad ah ee shaqada Baanka Adduunka ee gudaha Afrikada ka hoosaysa saxaaraha, fadlan booqo www.worldbank.org/afr

Nagu soo booqo Facebook: http://www.facebook.com/worldbankafrica
Kala soco Twitter: http://www.twitter.com/worldbankafrica
Mawjadayada YouTube: http://www.youtube.com/worldbank